Waaxda Cadaaladda ee Mareykanka

# Qeybta Xuquuqaha Rayidka

## Waxa ay tahay inaad ogaato ee ku saabsan Wareegta Oggolaanshaha ee Dugsiyadda Dadweynaha Denver (Denver Public Schools, DPS)

- ✓ Bartayaasha Luuqada Ingiriiska (English Language Learners, ELL) waxay xaq u leeyihiin inay **micno ahaan** iyo **sinaan ahaan** ay uga qeybgalaan dugsiga.
- ✓ Wareegta Oggolaanshaha DPS waxay ka rabta DPS inay qaado tallaabooyin gaar ah si loo hubiyo ELL inay u baran karaan Ingiriiska iyo nuxurka heerka-fasalka si darteed dhammaan ardayda DPS waxay yeelaanayaan fursadda sinaanta ay uga qeybgalayaan dugsiga.
- ✓ Haddii ilmahaaga yahay ELL ku hadla-Isbanashka, waxaad ka diiwaangelin kartaa barnaamij ku baxaya barashada luuqada afka hooyo ee Isbaanash sidoo adiga sidoo kale baranaya Ingiriis. Haddii dusiga xaafadaada uu bixinin barashada luuqada afka hooyo, DPS waxay bixin doontaa gaadiidka dugsiga lagu aadayo kaas oo sameeya.

**ELL (waxaa sidoo kale lagu yeeraya Bartayaasha Luuqadda ee Luuqadah badan "MLL" DPS) waa ardayda aan aqoon u laheyn Ingiriiska.*

**Waa inaad la hadasha shaqaalaha xafiiska koowaad (sida xog-haynta) haddii:**

1) Aad jaclan laheyd inuu turjumaan joogo kulumada dugsiga, ama
2) Aad jaclaan laheyd in dukumentiyada dugsiga ilmahaaga la fasiro.

**Waa inaad la hadasha maamulaa dugsigaaga haddii:**

1) Aad qabtaa su'aalo ku saabsan luuqada Ingiriiska ama adeegyada taageerada luuqada afka hooyo ee dugsiga ilmahaaga, ama
2) Waxaad u maleeysa inuu ilmahaaga aysan helin adeegyadda u baahnaayeen.

*Haddii aad u baahan tahay caawin dheeraad ah kadib marka aad la hadasho dugsigaaga, waxaad la xiriri kartaa Waaxda Waxbarashada Luuqadaha badan ee DPS (Multilingual Education, MLE) adia oo wacaya (720) 423-2040 ama iimayl u diraya ELAHotline_EGC@dpsk12.org*

Dukumentigan wuxuu sharxaya qaar ka mid ah shuruudaha Wareegta Oggolaanshaha DPS. Ma daboosho wax walba oo ku jirta Wareegta Oggolaanshaha. Waxaad ka heli kartaa macluumaad badan oo ku saabsan Wareegta Oggolaanshaha iyo Waaxda MLE DPS https://mle.dpsk12.org/about/

Waaxda Cadaaladda ee Mareykanka

# Qeybta Xuquuqaha Rayidka

## Waa maxay xuquuqahaaga ilmahaaga ee ku jira Wareegta Oggolaanshaha?

*DPS waa inay aqoonsata dhammaan ELL oo ay siisa iyaga iyo qoysaskooda adeegyada qaar.*

**Diiwaangelinta/isqorista dugsiga:**

- Dugsigaagu waa inuu weydiiya waxaa ay tahay luuqada looga hadlo guriga, luuqada koowaad ee ilmahaagu barto, luuqada inta badan uu ilmahaagu ku hadlo. Tani waxaa loo yaqaana Xog ururinta Luuqada Guriga (Home Language Questionnaire, HLQ).
- HLQ waxaa sidoo kale lagu helay Ingiriis, Isbaanash, iyo kuwa kale oo badan. Haddii aad u baahan tahay HLQ fasiran, weydii xog-haynta dugsigaaga.
- Haddii jawaabaha HLQ ay muujso luuqaad aan ka aheyn Ingiriis, dugsiga waa inuu imtixaaama ilmahaaga si loo arko haddii ay u qalmaan adeegyadda luuqada. Inta aad sugayso inaad jawaab hesho, dugsiga waa inuu siiya iyaga adeegyo ku meel gaar ah.
- Dugsigaagu waa inuu ku sheega wax ku saabsan adeegyadda taageerada luuqada Ingiriis ee laga helayo dugsigaaga iyo kuwa kale.
- Waxaad ilmahaaga u dooraan kartaa barnaamijka Luuqada Ingiriiska. Waad beddeli kartaa barnaamijka aad dooratay waqti walba inta lagu jiro diiwaangelinta ilmahaaga.

*DPS waa inay bixisa adeegyadda luuqada Ingiriiska si looga caawiyo ELL caqabadaha luuqadda inay ka gudbaan.*

**Inta lagu jiro sanad dugsiyaadka, ilmahaaga wuxuu xaq u leeyahay:**

- Barnaamijka luuqadda Ingiriiska ee haboon-fasalka waxaa dhigo macalimiin aqoon u leh;
- Waxbarashada hormarinta luuqadda Ingiriiska taas oo barta iyaga sida loo akhriyo, loo qoro, loogu hadlo, iyo fahamka Ingiriiska;
- Nuxurka tayada iyo qalabyada kale ee loogu talo galay fasalka ELL waxaa loola barbardhigi doonaa fasalada aan aheyn-ELL; iyo
- Labaduba adeegyada luuqada Ingiriiska iyo adeegyadda la xiriira-curyaanimada haddii ardayga ELL uu yahay curyaan.

*DPS waa inay qiimeysa fasalada, buundooyinka imtixaanka, jawaab celinta macalinka si loo hogaamiyo haddii ELL ay hormarayaan. Dugsiga Iimahaaga waa inuu kula soodsiiya a dadaalka ilmahaaaga isaga oo kuu soo dirayo warbixinada hormarka iyo qabashada shirarka waalidka/macalinka.*

## Waa maxay xuquuqahaaga ku jira Wareegta Oggolaanshaha?

- DPS waa inay kula xiriirta waalidiinta luuqad aad fahmayso si aad u hesho macluumaad la mid ah kuwa helaan waalidiinta ku hadla-Ingiriiska. DPS waa bixisa fasirid ama turjumida turjumaan aqoon u leh ama turjumaan ardayda ma isticmaali karto, walalaha, asaxaabta, ama shaqaalaha aan u tababar adeegan.
- DPS waa in ku fasirtaa ama af ahaan kuu turjuntaa dukumentiyada leh macluumaadka aasaasiga ah ee dugsiga-ama-Degmada ee luuqad ay waalidiinta fahmi karaan,xiaa haddii ilmaha aan loo aqoonsanin ELL. Tani waxaa ka mid ah:

- Foomamka diiwaangelinta
- Kararka warbixinta
- Waalidka iyo buug yaraha ardayga
- Ogeysiisyada tallaabada anshaxa
- Warqaddaha fasaxa ee loogu talo hawlaha ardayga
- Waxabarashada gaarka ah iyo adeegyadda la xiriira
- Barnaamijyaddda hibadda iyo talantiga
- Dugsiyada *Magnet* iyo *charter*
- Caafimaadka iyo badqabka dadweynaha

- Dugsigaagu waa inuu leeyahay xubnaha Guddiga La Talinta Waalidka (Parent Advisory Committee, PAC) oo ay doortaan waalidiinta dhalay carruurta ku jirta barnaamijka luuqada Ingiriiska. Ujeedada PAC waa in waalidiinta la siiyo macluumaad ku saabsan barnaamijka, kordhinta xiriirka u dhaxey waalidiinta ELL iyo DPS, u dib u qiimeyna hirgelinta barnaamijka, iyo dhagaysiga walacyada waalidka. Dugsigaaga waa inuu si joogto ah u qabtaa kulumada PAC, oo kuu sheega wax ku saabsan kulumadan sidaa darteed waad xaadiri karta, oo ku bixiya fasirida ama adeegyada kulumada.

**Si aad u soo wargeliso wax ku saabsan walaca ku saabsan u hogaansamida DPS ee Wareegta Oggolaanshaha:**

Bogga Xiriirka Xuquuqaha Rayidka ee DOJ
https://civilrights.justice.gov

Sanduuqa Boostada Wacyogelinta Bulshada DOJ
Community.DPS@usdoj.gov